# Qeybta Shatiga Adeegyada Difaacidda Carruurta

## *Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiiyo Guryaha Lagu Ogyahay Korinta Carruurta*

### S Waa maxay Qeybta Shatiga/Adeegyada Difaacidda Carruurta (LD/CPS)?

J Waaxda Carruurta, Dhallinta & Qoysaska ama DCYF marka ay soo hesho warbixin sheegeysa dacwad in ilma lagu dhibaateeyey ama lagu dayacay guryaha lagu ogyahay korinta carruurta, warbixintaas danbi-baaris ayaa lagu sameeyaa si loo ogaado haddii ay jirto dhibaateyn ama dayacaad. Danbi-baare ka socda LD/CPS ayaa dhammeystiraya danbi-baarista iyo qiimeynta badqabidda carruurta guryaha lagu ogyahay korinta carruurta.

### S Maxay tahay danbi-baarista LD/CPS marka la baarayo Dhibaateynta iyo Dayacaadda Carruurta ama CA/N?

J LD/CPS waxay danbi-baarista ku sameynayaan CA/N sida ku qeexan sharciga, RCW 26.44.020. Sida sharcigu u qeexayo dhibaateynta ama dayaacadda ilmaha waa fara-xumeynta, suuqgelin la xiriirta galmo ama dhaawac waxyeelleeya caafimaadka, fayaqabka, badqabka ama hagardaamo ama si xun ula-dhaqmid uu qof ku sameeyo ilma uu daryeelo ama hayo. LD/CPS waxa kale oo ay qiimeeyaan badqabidda carruurta marka ay danbiga baaraan.

### S Waa maxay tusaaleyaal ah waxyaabo dhacay oo ay baareen LD/CPS?

J Tusaaleyaasha waxyaabaha ay baareen LD/CPS waxaa ka mid ah, balse aysan ku koobneyn waa: habka edbinta oo keena dhaawacyo, si aan sax ahayn in ilma loo qabto, marmar inaan laga warhayn oo ay ilmuhu khatar galaan, daawooyinka oo si aan sax ahayn loo siiyo, tacaddiyo galmo la xiriira iyo inaan xil la iska saarin carruur dhexdooda is-dirireysa.

### S Sidee baan ku ogaanayaa inay jirto danbi-baarista LD/CPS?

J Danbi-baare ka socda LD/CPS ayaa kuula soo xiriiraya sida ugu dhakhso badan ee danbi-baaristu u bilaabato marka aysan jirin khatar la xiriirta badqabidda iyo habsamida danbi-baarista. Waxaa laga yaabaa in laguu yimaado ama taleefan laguu soo diro. Danbi-baaraha LD/CPS guriga ayuu kuugu imaan kaaraa adigoon ogeyn.



### S Maxaa la iiga sheegi doonaa danbi-baarista?

J Marka wareysi toos ah lagula yeelanayo, waxaa laguu sheegi doonaa dacwooyinka jira sida habdhaqan dayacaad ah, jirdilid, tacaddiyo galmo la xiriira ama suuqgelin galmo la xiriirta. Danbi-baaraha LD/CPS ayaa kula wadaagi doona macluumaad badan intii suurtagaleysa oo aan khatar gelineyn habsamida danbi-baarista.

### S Ma u sheegi karaa danbi-baaraha waxa dhacay sidaan ogahay?

J Haa, taasi waaba ujeeddada wareysiga. Hadda waa marka aad sharxeyso wixii dhacay iyo fursadda aad ku sheegi karto wixii macluumaad kale ama caddeyn qoraal ah. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa danbi-baaraha markii aad rabto si aad ula wadaagto wixii macluumaad dheeraad ah ama u weydiiso su'aalaha aad ka qabto danbi-baarista.

### S Ma u soo gudbin karaa hadal qoraal ah?

J Haa, waad u soo gudbin kartaa hadal qoraal ah haddii ay kaa heli karaan ka hor intaan kiiska la xirin. Wixii hadal qoraal ama caddeyn ah waxaa la tixgelinayaa danbi-baarista intay socoto waxaana la gelinayaa feylka kiiska LD/CPS.

### S Qof ma ila joogi karaa markaan wareysiga galayo?

J Haa, qof weyn oo dhexdhexaad ah ayaa kula joogi kara marka wareysigu socdo balse waa inaad saxiixdo foomka oggolaanshaha ee macluumaadkaaga uu ogaanayo haddii aysan khatar ku imaaneyn habsamida danbi-baarista.

S **Yaa kale oo la wareysanayaa marka ay socoto danbi-baarista LD/CPS?**

J Inta ay socoto danbi-baarista, dhammaan ilmaha dhibbaneyaasha dacwadu khuseyso ayaa la wareysanayaa 24 ilaa 72 saacadood gudahood. Dhammaan carruurta lagu ogyahay guryaha korinta waa la wareysan doonaa oo danbi-baare ka socda LD/CPS ayaa ku weydiisan doona oggolaansho uu ku wareysto ilmaha. Sharciga gobolka ayaa DCYF iyo LD/CPS u oggolaanaya inay wareystaan dhibbaneyaasha dacwadu khuseyso iyo ilmaha guryaha lagu koriyo iyadoon waalidkood oggolaansho laga qaadan. LD/CPS waxa kale oo ay wareysan doonaan markhaatiyada iyo qaraabada.

S **Boolis ma ku lug yeelanayaan?**

J Haddii uu fal-dandiyeed jiro, LD/CPS booliska ayey wargelin doonaan. Booliska iyagaa go'aankooda ka gaara haddii ay sameyn doonaan ama aysan sameyn doonin danbi-baaris. Haddii boolisku go'aansado danbi-baaris, LD/CPS booliska ayey uga hareysaa oo iyagaa la wareeegaya hoggaanka danbi-baarista.

S **Wakhti intee le'eg ayey danbi-baaristu qaadan doontaa?**

J LD/CPS waxay ku dedaalaan in ay danbi-baaris kasta ku dhammeeyaan 45 maalmood; hase yeeshee, danbi-baarista qaar ayaa wakhti dheer qaata. Haddii wakhtiga danbi-baaristu ka badato 45 maalmood, waraaq ogeysiis ah ayaa laguu soo dirayaa. Haddii aysan ku lug lahayn boolis ama qareen dacwad-ooge ah, sharciga gobolku waxa uu dhigayaa in ay LD/CPS danbi-baarista ku dhammeyso 90 maalmood gudahood.

S **Gurigeyga ma la keeni doonaa carruur kale oo la igu ogaanayo korintooda danbi-baaristu inta ay socoto?**

J Go'aanka noocaas ah kiis kasta si gaar ah ayaa looga gaaraa. Carruurta lagu ogyahay guryo in lagu koriyo laguuma keenayo haddii ay maamulka waaxda kaa joojiyaan ama aad adigu joojin codsato.

S **Gurigeyga ma laga kaxeyn doonaa carruur kale oo la igu ogaanayo korintooda danbi-baaristu inta ay socoto?**

J Mararka qaarkood carruurta lagu qoro guryo lagu ogyahay korintooda waa laga kaxeeyaa inta ay danbi-baaristu socoto. Go'aankan waxa loo gaaro waa si loogu dedaalo arrimaha badqabidda carruurta. DCYF sharci ahaan ayagaa masuul ka ah guryaha carruurta lagu qoro si loogu koriyo oo waajib ayey ku tahay inay ka kaxeeyaan carruurta markii ay muhiim tahay ee lagu dedaalayo badqabiddooda iyo fayaqabkooda.

S **Ka warran carruurta qabiillada dhaladka dalkan ee aan hayo?**

J Qabiillada ayaa la ogeysiinayaa danbi-baarista oo iyagaa go'aansanaya meeshii ay geynayaan.

S **Ma guryahooda ayaa lagu celinayaa carruurta lagu koriyo guryo lagu ogyahay marka danbi-baaristu dhammaato?**

J Arrintan waxay ku xiran tahay natiijada ka soo baxda danbi-baarista iyo waxa ay ku jirto danaha carruurta.

S **Xafiiska shatiga i siiyey ma ogaanayaa danbi-baarista?**

J Haa, xafiiska shatiga waa lagu wargelinayaa danbi-baarista iyo natiijada.

S **Waa maxay natiijooyinka suurtagalka ah ama jawaabaha danbi-baarista?**

J Natiijooyinka ama jawaabaha danbi-baarista waa in danbi la helo ama in la waayo. Jawaabaha waxaa qeexaya sharci hoosaadka gobolka (RCW 26.44.020 and WAC 110-30-0030).

Danbiga la helo: Waxay u badan tahay dhibaateyn ama dayacaad inay dhacday.

Danbiga la waayo: Waxay u badan tahay dhibaateyn ama dayacaad inay dhicin ama in aysan jirin macluumaad dhab ah oo lagu go'aamiyo haddii ay jiraan dhibaateyn ama dayacaad dhacday.

Boolisku siyaabo ka duwan CPS ayey ku soo caddeeyaan danbiyada. Taas macnaheedu waa in la heli karo danbi dhacay oo ah dhibaateyn xataa haddii boolisku uusan soo gudbin dacwooyin faldanbiyeed ah.

S **Waa maxay danbi-baarista halista keliya ah?**

J Danbi-baarista halista keliya waa danbi-baaris lagu qiimeeyo heerka halista carruurta ee wakhtiga xaadirka ama mustaqbalka. Ma jiraan wax la helay oo ah danbi-baarista halista keliya.

S **Sidee baa la igu soo ogeysiin doonaa natiijada danbi-baarista?**

J Marka danbi-baaristu dhammaato, waxaa laguu soo dirayaa warqad ah wixii la helo. Haddii danbi la isku helo, habka racfaanka ayaa lagu soo qoraa waraaqda.

S **Ma codsan karaa koobbiga danbi-baarista?**

J Haa waxaad ka codsan kartaa qoraallada dadweynaha loo bandhigo ee: **dcyf.publicdisclosure@dcyf.wa.gov**.

S **Sidee bay arrintan u saameyneysaa shaqa-heliddeyda?**

J Sida ay u badan tahay, danbiga la isku waayo ma saameynayo shaqa-heliddaada. Hase yeeshee, haddii danbi la isku helo oo aad shaqo ka hesho goob la shaqeysa carruurta ama dadka waaweyn ee nugul, shaqada aad hesho saameyn ayey ku yeelaneysaa.

## Kooxda Taakuleynta Haynta ee Waalidka Koriya Carruur Lagu Ogyahay ama FIRST

FIRST waa meel u diyaarsan waalidka koriya carruur lagu ogyahay si ay uga helaan caawimaad marka ay jiro danbi-baarista LD/CPS. Waxa kale oo ay dadka u sii gudbiyaan meelo kale oo muhiim ah. Waxaad xafiiska FIRST kala soo xiriiri kartaa 866-393-6186.

## Anigoo ah waalid shati lagu siiyey korinta carruur la igu ogyahay, halkee baan macluumaad dheeraad ah ka helayaa?

**www.dcyf.wa.gov/services/foster-parenting**.

*Haddii aad rabto inaad hesho koobbiga waraaqdan oo ku qoran hab ama luuqad kale, fadlan la soo xiriir Xiriirka Dadweynaha ee DCYF (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*